

Baahin Degdeg ah

La xiriir: Qolka Wararka ee Port of Seattle

limayl: [media@portseattle.org](mailto:media@portseattle.org)

## **Maalgelinta Port of Seattle oo ah \$850,000 oo loogu talagalay Horumarinta Deegaanka ee ay Bulshadu Hoggaaminayso**

*18 urur oo ka tirsan Degmada South King ayaa heli doona maalgelin lagu hagaajinayo tayada nolasha, lagu horumarinayo goobaha cagaaran, oo lagu soo celinayo kaymaha*

Port of Seattle waxay maalgelin \$850,000 ah siin doontaa 18 urur oo ay bulshadu hoggaamiso oo leh mashaariic lagu horumarinayo deegaanka bulshooyinka ku xeeran Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma (SEA), kuwaas oo gaaraya Beacon Hill, Rainier Valley, Kent Valley, iyo Duwamish Valley. Maalgelinta, oo lagu maalgeliyo tirada ugu badan ee ururada ilaa hadda jira, waxaa loo soo mariyaa [Barnaamijka Sanduuqa Horumarinta Bulshooyinka iyo Bii'ada ee South King \(South King and Port Communities Fund Environmental Improvements Program\)](#), kaasoo taageera mashaariicda balaarinaysa goobaha cagaaran, soo celinaysa bii'ada dabiiciga ah, kor u qaadaysa wacyiga deegaanka iyo waxbarashada ee bulshooyinka lasoo gacan-bidixayn jiray.

“Maalgalinadaanu waxay si toos ah hanti u galinayaan gacmaha ururada bulshada ee hoggaaminaya xalalka deegaanka ka agdhow garoonka,” waxaa sidaas yiri Guddoomiyaha Guddiga Port of Seattle, Toshiko Hasegawa. "Sanduuqani waa mid ka tarjumaya sida aan uga go'annahay wax ka qabashada baahiyaha deegaanka ee bulshooyinka deriska ah."

Barnaamijka Horumarinta Deegaanka (EIP) — oo hore u ahaan jiray Barnaamijka Deeqaha Deegaanka — wuxuu ku martiqaadayaa kooxaha bulshadu hoggaamiso inay codsadaan maalgelinta hawlaha sida:

- Dib u soo celinta deegaanka iyo beeraha iyo beerista geedaha
- Barnaamijyada waxbarashada deegaanka
- Hagaajinta beerta ama garoonka ciyaarta
- Rakibidda farshaxanka dadweynaha oo diiradda saaraya deegaanka

Iyada oo loo marayo maalgelin iyo iskaashi lala yeesho ururada ku salaysan bulshada, Barnaamijka Horumarinta Deegaanka (EIP) wuxuu taageeraa mashaariicda bulshooyinka taariikh ahaan la iska indha tiray sababo la xiriira dhaqamada isticmaalka dhulka ee aan sinnayn iyo barakaca. EIP waxay u ogolaaneysaa Dekadda inay maalgashato magaalooyinka ku xeeran garoonka diyaaradaha, kuwaas oo gaara Kent Valley, Duwamish

Valley, Rainier Valley iyo Beacon Hill, isla markaana maalgeliya mashaariicda ay hoggaaminayaan kuwa ugu aqoonta badan baahiyaha bulshadooda.

Dekeddu waxay maalgelinno sannado badan ah siisaa codsadayaasha mashaariicda soconaya hal, laba, ama saddex sano, ilaa \$20,000 sannadkii iyo ilaa \$60,000 oo loogu talagalay maalgelinta sannado badan. Maalgelinta sannado badan waxay kordhisaa saameynta maalgashiga bulshada ee Dekedda waxayna gacan ka geysataa taageeridda qorsheynta iyo hirgelinta mashruuca waara.

"Your Money Matters waxaa sharaf u ah inaad iskaashi la sameyso Dekadda Seattle iyo Auburn Parks and Recreation iyada oo loo marayo Barnaamijka Horumarinta Deegaanka ee Sanduuqa Bulshada ee South King iyo Port Communities Fund si loo awoodsiiyo dhalinyarada inay hoggaamiyaan isbeddel deegaan oo macno leh oo ku yimaada bulshadooda," **waxaa sidaas yiri Agaasimaha Guud ee Your Money Matters Executive Director Clinton Taylor.** "Mashruucan wuxuu ku saabsan yahay wax ka badan soo celinta goob dadweyne oo la dayacay, waa maalgelin lagu sameeyo dhalinyarada BIPOC iyagoo ah wakiillo deegaan, hoggaamiyeyaal, iyo xirfadlayaal mustaqbalka ah oo ku takhasusay dhaqaalaha cagaaran." Iyada oo loo marayo dib-u-soo-celin gacan-ku-hayn ah, beerista dhulka hooyo, iyo daryeelka socda ee goobta, dhallinyaradeennu waxay gacan ka geysan doonaan in aaggan loo beddelo hanti bulsho oo firfircoon oo waarta oo ka tarjumaysa kibirka, adkeysiga, iyo fursadda dadka deggan Auburn sannado badan oo soo socda.

### **Ballaarinta maalgashiga bulshada**

Sannadkii 2024, Guddiga Port of Seattle wuxuu oggolaaday \$14 milyan, taasoo ka badan \$10 milyan shantii sano ee la soo dhaafay, si loo sii wado mashaariicda ay bulshada hormuudka ka tahay ee South King iyo Sanduuqa Bulshada Dekedda (SKPCF) kuwaas oo horumarinaya sinnaanta, horumarinta deegaanka, iyo helitaanka shaqooyinka warshadaha la xiriira dekedaha. Tan iyo markii la bilaabay 2020, barnaamijku wuxuu casriyayn ku sameeyay sida Port ula shaqeyso bulshooyinka si loo horumariyo helitaanka fursadaha maalgelinta. Maalgashiga SKPCF wuxuu kobciyay iskaashi cusub oo lala yeesho ururada bulshada ee ay hormuudka ka yihiin BIPOC iyo taageerada dheeraadka ah ee bulshooyinka midabka leh ee qaab-dhismeedka laga saaray.

Wareegyada maalgelinta 2025-2029 waxaa ka mid ah:

- Hoos u dhigista shuruudaha isku dheelitirka ee ururada qaataha laga bilaabo 3:1 ilaa 2:1, sida uu qabo sharciga gobolka Washington, taasoo hoos u dhigaysa caqabadda mashaariicda ay bulshadu hoggaamiso.

- Ballaarinta gobolka juqraafiyeed ee u qalma si loogu daro meelaha Degmada South King, Duwamish Valley, iyo Beacon Hill oo Tasmada Sinnaanta Port of Seattle ay u aqoonsato inay leedahay kala duwanaansho
- Sii wadista mudnaanta siinta ballanqaadka Port ee lixda magaalo ee u dhow garoonka diyaaradaha iyo aqoonsashada sida codsiyada mashaariicda magaalooyinkaas ay u heli doonaan mudnaanta koowaad

Marka laga soo tago 18-ka urur ee hadda helaya lacagaha, siddeed urur ayaa sii wada shaqada mashaariicda deegaanka ee Burien, Des Moines, Federal Way, Normandy Park, Seatac, iyo Tukwila iyada oo loo marayo barnaamijyada ikhtiyaarka maalgelinta sannado badan.

### **Ka faa'iidaysteyasha EIP ee 2026**

Waa kuwan wax badan oo ku saabsan ururada iyo barnaamijyada loo doortay inay helaan maalgelin.

**Yaraynta Kala duwanaanshaha Dhaqamada** — \$60,000 si dhalinyarada qaxootiga iyo soogalootiga ah loogu xiro bii'ada si loo soo celiyo loogana shaqaysiiyo goobaha bulshada ee cagaaran ee ku yaala SeaTac, Burien, iyo Tukwila, taasoo keenaysa dareenka ka-mid-noqoshada bulshada iyo wanaagga dhaqanka.

**Dirt Corps** — \$60,000 oo maalgalin ah oo ku baxaysa Barnaamijka Outdoor Innovators kaasoo la shaqaynaya hogaamiyeyaasha dhalinyarada si loo soo celiyo Hilltop Park oo ku yaala Burien.

**Duwamish River Community Coalition** — \$60,000 oo lagu maalgalinayo diyaarinta farshaxanka Duwamish Valley oo lagu rakibayo goobaha dadweynaha kuwaasoo xoojinaya badbaadada wado marista.

**Ururka Waarista Duwamish Valley (DVSA, Duwamish Valley Sustainability Association)** — \$60,000 oo loogu talagalay in lagu dhiso talaabooyinka kahortagga daadadka taasoo ah qaab muujinaya adkaysiga bulshada degen Duwamish Valley.

**Earthgen** — \$60,000 oo lagu taageerayo soo celinta iyo hagaajinta mashaariicda maaraynta biyaha roobka ayadoo lala kaashanayo degmo dugsiyeedyada Highline iyo Renton. Mashruucyadu waxay ka dhacaan Burien, SeaTac, Renton, iyo Normandy Park.

**Environmental Science Center** — \$60,000 Barnaamijka Beach Heroes, kaas oo fududeeya nadiifinta iyo dib u soo celinta xeebta ee Seahurst Park iyada oo loo marayo dhacdooyinka bulshada iyo waxbarashada diiradda saareysa carruurta iyo dhalinyarada ku nool Degmada South King.

**[Food Forest Collective](#)** — \$60,000 si loogu taageero hagaajinta carrada iyo dayactirka beerta ee Beerta Bulshada Kaymaha Cuntada ee Beacon Hill.

**[Highline Homeschool Program](#)** — \$5,000 oo loogu talagalay Mashruuca Beerta Dareenka iyo Geedaha Native ee Dabiiciga ah ee Des Moines.

**[New Start Community Garden](#)** — \$19,000 oo loogu talagalay rakibidda farshaxanka ee Beerta Shark ee Burien si loo horumariyo badbaadada iyo marin u helidda.

**[Partner In Employment](#)** — \$60,000 waxay taageertaa Youth Restoration Crew kuwaas oo abaabula dadaallada nadiifinta beeraha ee SeaTac, Burien, iyo Federal Way.

**[Rainier Beach Action Coalition](#)** — \$60,000 ayaa taageeraya shaqada nadiifinta iyo dib u soo celinta ee goobaha dadweynaha ee ku baahsan aagga Dooxada Rainier/Koonfurta Beacon Hill.

**[Renton Art Oasis](#)** — \$5,000 ayaa maalgelisa rakibidda sawirrada kalluunka salmon ee Cedar River ee Renton.

**[River Access Paddle Program](#)** — \$60,000 si loogu taageero Barnaamijka Back to the River, fududeynta doon-raacista bulshada, caafimaadka dhimirka, iyo ilaalinta biyaha ee Webiga Duwamish.

**[Tilth Alliance](#)** — \$60,000 oo loogu talagalay maalgelinta Mashruuca Beerta ee Degmada South King, kaas oo taageera maamulka beeraha bulshada ee Tukwila iyo Burien.

Troop 361 — \$1,000 si loo aburo barnaamijka shinnida bacrimisa dhirta oo ka dhacaya Hylebos Blueberry Farm Park ee Federal Way.

**[Trust for Public Land](#)** — \$60,000 si loo horumariyo adeegyada dadweynaha ee Legacy Park ee Renton.

**[Your Money Matters](#)** — \$60,000 si loogu taageero barnaamijka Fresh Groundz kaas oo dhalinyarada ku dhiirrigeliya inay dib u soo nooleeyaan dhulka dadweynaha ee la dayacay ee Auburn.

**[Machadka Tababarka Khibradaha Dhalinyarada \(YETI, Youth Experiential Training Institute\)](#)** — \$60,000 si loogu taageero mashaariicda nadaafadda iyo dib-u-soo-celinta ee ay hormuudka ka yihiin dhalinyaradu ee degmooyinka dugsiyada Highline iyo Tukwila. Mashruucyadu waxay ka dhici doonaan Burien, SeaTac, Tukwila, iyo Des Moines.

**Ku saabsan Sanduuqa Bulshada South King iyo Dekedaha (SKPCF, South King and Port Communities Fund)**

Port waxay aasaastay [Sanduuqa Saamaynta Bulshada South King](#) (oo hadda ah Sanduuqa Bulshada ee Koonfurta King iyo Dekedda) sannadkii 2019 si loo horumariyo iskaashiyo ku salaysan sinnaanta iyo in la siiyo ilo iyo taageero bulshooyinka aan taariikh ahaan la siinin adeegyada, qowmiyadaha iyo dhaqanka kala duwan ee u dhow garoonka diyaaradaha. Laga bilaabo 2020 ilaa 2024, SKCCIF waxay bilowday afar wareeg oo barnaamijka Soo kabashada Dhaqaalaha (hadda Fursadaha Dhaqaalaha ee Bulshooyinka) iyo barnaamijka Deeqaha Deegaanka (hadda Horumarinta Deegaanka), si loo maalgeliyo mashaariicda ay bulshadu hoggaamiso ee abuurta waddooyin loo maro tababar iyo shaqooyin mushahar wanaagsan leh, iyo in la maalgeliyo horumarinta deegaanka. Tan iyo markii la aasaasay sanduuqan, in ka badan 50 urur ayaa helay wadarta guud ee \$9.25 milyan, taas oo maalgelisay in ka badan 80 mashruuc.

###

#### **Xog ku saabsan Port of Seattle**

*Waxaa la aasaasay 1911 waxaana lagu aasaasay cod dadweyne oo ah dowlad ujeedo gaar ah leh, Port of Seattle waxay higsaneysaa inay horumariso fursadaha dhaqaale iyo tayada nolosha gobolka iyadoo horumarineysa ganacsiga, safarka, ganacsiga, iyo abuurista shaqada si caddaalad ah, isla xisaabtan leh, iyo mas'uuliyad deegaan.*

*Dekadu waxay leedahay oo maamushaa Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma (SEA), Terminaalka Kalluumeysatada — oo ah hoyga maraakiibta kalluumeysiga ee Waqooyiga Baasifigga — iyo maraakiibta dadweynaha. Dekadu waxay sidoo kale leedahay laba terminaalka oo maraakiibta dalxiiska ah, terminaalka badar qaabilsan, hanti ma-guurto ah, iyo terminaalka xamuulka badda ah iyada oo loo marayo iskaashiga ay la leedahay Isbahaysiga Northwest Seaport.*

*Hawlgallada Port of Seattle waxay taageeraan ku dhawaad 205,000 oo shaqo iyo in ka badan \$12 bilyan oo mushaar ah oo ka dhaca gobolka oo dhan. 12 Kii sano ee soo socda, Ajandaha Qarniga ee Dekada wuxuu doonayaa inuu abuurto 100,000 oo shaqo oo dheeraad ah iyada oo loo marayo kobaca dhaqaalaha, iyadoo noqonaysa dekedda ugu horreysa ee cagaaran iyo tamarta ku shaqaysa ee qaranka.. Xog badan ka baro [Webseedka Port](#).*

---